# Jawi daryeel caafimaad amaan ah oo laysku halayn karo

Isbitaalka waa inuu lahaadaa jawi daryeel caafimaad amaan ah oo ay isku halay karaan bukaanka, booqadeyaasha iyo shaqaalahaba.

**Sidaa daraadeed xeerarkaan soo socda ayaa ka jira isbitaalka:**

- Isbitaalka ma ahan meel dadweynaha ku kulmaan. Sidaa daraadeed shaqaalaha waxay xaq u leeyihiin inay isbitaalka ka saaraan dadka aan wax arrin ah u imaanin ama u arkaan inay dadka dhibaayaan, rabsheynaayaan ama cabsi gelinaaya.
- Takoorida looma dulqaadanaayo, rabsho iyo handadaad waa la mid.
- Hubka noocyadiisa kala duwan lalama soo geli karo.
- Khamri iyo muqaadaraad waa ka mamnuuc.
- Sigaarka waxaa loo oggolyahay in lagu cabo meelaha loogu talo galay oo keliya.
- Shaqqalaha waxay xaq u leeyihiin inay xadadaan tirada dadka soo raacaaya ama soo booqanaaya qofka bukaanka ah.
- Waxaad u baahaneysaa ruqsad haddii aad rabtid inaa sawir ku qaadid isbitaalka dhexdiisa.
- Xaywaanka waa ka mamnuxx in isbitaalka loola soo galo. Marka laga reebo eeyaha indhoolayaasha iyo eeyaha xirfadaha loo tababaro tusaale ahaan eeyaha booliska isticmaalaan.
- In wax lagu kala dhex iibsado waa ka mamnuuc
- Hawlaha isbitaalka wax ka baxsan in lacag ururin lagu sameeyo waa ka mamnuuc.
- Faafinta macluumaadka/fariimaha ka baxsan hawlaha isbitaalka waa ka mamnuuc.

Universitetssjukhuset Örebro, 701 85 Örebro
www.regionorebrolan.se/uso